

## **Guud-Marka Xaquuqda Racafaanka**

Waxaad xaq u leedahay in aad racfaan ka qaadato go'aan kasta oo xadidda ama xayira helida adeegyada hay'ada Metro Mobility. Kuwaa waxaa ku jira:

- Xayirida falalka xun la xiriira
- Xayirida goynta balamaha la xiriira
- Go'aaminta xaq u-yeelad la'aanta
- Go'aaminta xaq-u-yeelad sharuuda leh
- Go'aaminta xaq-u-yeelad ku meel gaar ah

Racfaanada waxaa ku jiri kara sababha aad ugu malaynayo in go'aan khalad ah la gaartay, laakiin, uma baahna inay ku jирто akhbaартан. Waa khasab in aad u soo dirto dhamaan codsiyada racfaanada oo dhan ciwaanka soo socda:

METRO MOBILITY SERVICE CENTER  
APPEALS  
390 ROBERT ST N  
SAINT PAUL MN 55101

Hay'ada Metro Mobility waa khasab inay hesho racfaanada ku saabsan xaq-u-yeeladka 60 cisho gudahood laga bilaabo maalinta go'aankaa la soo saaro, iyo xayiraada rafaanada ka hor bilowga xayiraada. Dib ayaanu u dhigi doonaa wixii xayiraad ah ee racfaan laga qaato ilaa inta arrinta racfaanku dhinac u dhacayso.

Gudiga xirfadlayaasha ee dhagaysanaya racfaanku xulafo lama aha hay'ada Metropolitan Council waana yaqaanaan xeerarka iyo sharciyada quseeya dadka naafada ah iyo gaiiidkoodaba (ADA). Waxa aanu qabanaa balanta dhagaysiga dacwadaha 30 gudahooda kolka uu racfaanku na soo gaaro.

Xaq waxaad u leedahay inaad ka qayb gasho dacwada dhageysiga racfaankaaga, laakiin khasab kuguma aha inaad timaado. Waxaad xaq u leedahay inaad bixiso dukumiintiyo gargaaraya dacwadaada iyo/ama aad la timaado qof ku caawiya, laakiin khasab ma aha inaad taa sameysaa.

Gudiga Racfaanku waxa uu kuu soo diri doonaa warqad kula socodsiinaysa go'aankooda iyo sababaha go'aankooda ka dambeeyaa. Go'aanka Gudiga Racfaanku waa kama dambeys racfaan kalena laga qaaadan karo. Gudiga isaga ayaa go'aanka gaari waxa uuna la socod siin doonaa go'aankaa qolyaha dacwadu ka dhaxeyso 30 cisho gudahood laga bilaabo waqtiga dhageysiga dacwada.